# ***AXDIGA MEEQAAMKA***

# ***QAXOOTIGA***

***Wuxuu Qabsoomay 28ka Juulaay 1951, Geneva.***

***DHAQAN GALAY: 22KII APRIIL 1954 SI WAAFAQSAN QODOBKA 43AAD.***

***DIIWAANKA: AXDIGA QARAMAD MIDOODBAY TIRISIGA 2545,CADADKA 189aad BOGGA 137aad***

## ***GOGOL DHIG***

***Dhinacyada (Wadamada)Heshiiska Ku Jira,***

Iyadoo la tixgalinayo xeerka Qaramada Midoobay iyo Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadamaha ee Golaha loo Dhan yahay ansixiyey 10kii Disember 1948kii uu sugay ama xaqiijiyay mabaadi'ida ah in uu aadamuhu helo xuquuqaha iyo xoriyadaha aasaasiga oo takoor la,aan ah,

Iyadoo la tixgalinayo Qaramada Midoobay, kulamo kala duwan, ka cadeeyeen tixgalintooda qotada dheer ee ay siinayaan qaxootiga iyo sida ay ugu hagar baxayaan inay u hubiyaan ama u xaqiijiyaan inqaxootiyada sida ugu balaadhan ee suurto gal ah u adeegsadaan xuquuqaha iyo xoriyadahan aasaasiga ah,

Iyadoo la tix galinayo ay muhiim tahay in dib loo eego isla mar ahaantaana la is waafajiyo heshiisyadii hore ee caalamiga ahaa ee la xidhiidhay meeqaamka qaxootiga lana fidiyo baaxada saamayntooda iyo ilaalinta ay heshisyadani siinayaan qaxootiga, iyadoo heshiisyo cusub laga galayo,

Iyadoo la tixgalinayo magan galyo la bixiyaa ay wadamo dhawr ah dul saari karto culays aan haboonayn oo baaxad wayn, isla mar ahaantaana aanay surto gal ahayn in xal cuntama loo helo dhibaato Qaramada Midoobay aqoonsaday baaxadeeda iyo nooca ay tahayba iyadoon iskaashi caalami ah laga yeelan.

Iyadoo la oo muujinayna rajada ah in dhamaan dawladaha aqoonsan dabiciga bulsho iyo ta ban'aadanimo ee ay leedahay dhibaatada qaxootigu, ay qabanayaan wax walba oo karaankooda ah si ay uga hortagaan in dhibkani noqdo mid horseeda xiisad dawladaha dhex mara,

Anagoo xuseyna Hay'adda Qoxootiga ee Qaramada Midoobay loo xilsaaray kormeerida heshiisyada caalamiga ah ee illalinta qaxootiga, isla mar ahaantaana aqoonsan inay talaabooyin isku dubbarid taaba-gal ah oo loo qaato ka gun gaadhida dhibaatadan ku xidhnaan doonto iskaashi dawladuhu la yeeshaan wakiilka Hay'adda Qoxootiga;

WAXAA LAGU HESHIIYAY SIDAN SOO SOCOTA:

***CUTUBKA 1***

***Qodobo Guud***

***Qodobka 1aad***

***Qeexida Erayga "qaxooti"***

B. **Ula jeedooyinka Axdigan, erayga "qaxooti" waxaa loo adeegsanayaa qof kastoo:**

(1) Qaxooti ahaan loogu aqoonsaday Qorsheyawgii 12kii May 1926 iyo 30kii Juun 1928 ama Axdiyadii 28kii Oktoobar 1933 iyo 10kii February 1938, Hab maamuuskii 14kii Sibtembar 1939 ama Dastuurka Ururka Caalamiga ah ee Qaxootiga.

Go'aamadii u qalmid la'aanta ee uu qaatay Ururka Caalamiga ah ee Qaxootiga intay ku guda jireen hawlgalkooda kama hor istaagayso in meeqaamka qaxootiga la siiyo dadka buuxiya shuruudaha ku xusan tuduca 2aad ee qormadan;

(2) Natiijada ka dhalatay dhacdooyinkii (ka Dhacayay) ka hor 1dii Janaayo 1951kii loona aanaynayo cabsi cadaymo la taaban karo oo salkana ku haysa caddibaad lagu mutaysto sababo la xidhiidha jinsi, diin, dhalasho,ka tirsanaan urur-bulsheed gaar ah ama fikir siyaasadeed, islamar ahaantaana dibbadda uu ka joogay dalkii uu u dhashay aanu awoodi ama cabsidaas darteed, raali ka hayn in uu ka fa'iidaysto illalinta dalkaas; amase ruux, aan dhalasho lahayn kana maqan dalkii hore ee deegaanka caadiyan uu u lahaa sababo la xidhiidha dhacdooyinkaa awgeed, aanu awoodin, amase cabsidaas darteed uuna damacsanayn dib ugu noqoshada dalkaa.

Marka qofku leeyahay in ka badan hal dhalasho, erayga dalka dhalashadiisa wuxuu la macno noqonayaa dal walba oo ka mid ah wadamada uu muwaadinka ka yahay isla mar ahaantaana qofna looma arkayo inuu waayayo ilaalinta dalka uu u dhashay hadii, iyadoo ayna jirin sabab taaba-gal ah oo ku salaysan cabsi cadayn la taaban karo leh uuna ka faaiidaysan mid ka mid ah dalalka uu muwaadinka ka yahay.

T. (1) Ula jeedooyinka axdigan, erayada "dhacdooyinka taagnaa (ka dhacay) ka hor 1dii Janaayo 1951dii" ee qodobka 1aad qaybta B, waxaa loo qaadanayaa inuu la macno yahay midkood.

(b) "Dhacdooyinka ka taagnaa Yurub ka hor 1dii 1951;dii ama ;

(t) "Dhacdooyinka ka taagnaa Yurub ama meelo kale ka hor 1dii 1951dii, dalalka Heshiiska ku jiraana waa inay baaq ka soo saaraan xiligii saxeexa ansixinta ama ku biirida, kaasoo cadaynaya midka ay

macnayowgaas ku adeegsanayaan ujeedadeeda waajibaayadooda Axdigan.

(2) Dal walba oo heshiiska ku jira oo qaatay doorbididda.

**(b)** Xili walba wuxuu karaa inuu u fidiyo waajibaadkiisa isagoo qaadanaya doorbidida.

**(t)** Isla mar ahaantaana ku war galinaya xoghayaha guud ee qaramada midoobay.

**(J)** Adxigan looma adeegsan doono ruux walba oo ku sifooba shuruudaha ku xusan qaybta B hadii:

(1) Uu si iskii ah dib uga faaiidaysato Ilaalada dalka uu u dhashay; ama

(2) Isagoo horay u lumiyey dhalashadiisii, hadana uu si iskii ah dib u heley ama

(3) Uu helo dhalasho cusub, isla mar ahaantaana uu ka faa'iidaysto Ilaalada dalka dhalashadiisa cusub; ama

(4) Uu si iskii ah dib u dego dalkii uu markiisi hore ka tagay ama meel ka baxsan dalka uu ku sugnaa isagoo cabsi ka qaba cadaadis; ama

(5) Maadaama sababihii qaxootinimada loogu aqoonsaday ay joogsadeen isagu sinaba diida karamayo inuu ka faa'iideysto Ilaalada dalka uu u dhashay;

Waxaase sharci ah in aan tuducan loo adeegsan karin ruux qaxooti ah oo hoos imanaya qaybta B (1) ee Qodobkan kaas oo ku andacoon kara

duruufo qalafsan oo ka soo if baxay cadaadis hore oo loogu diidanaa ka faaiidaysiga daryeelka dalka uu u dhashay;

(6) Ruux aan isagu lahayn dhalasho hase ahaatee, maadaama xaaladihii qaxootinimada loogu aqoonsaday meesha ka baxeen, awood u leh in uu ku noqdo dalkii uu deganaanshihiisii hore ee joogtada ahaa ku lahaa;

Waxaase shardi ah in aan tuducan loo adegsan karin qof qaxooti ah oo hoos imanaya qaybta B (1) ee Qodobkan kaas oo ku andcoon kara duruufo qalafsan oo ka soo if baxay cadaadis hore oo loogu diidanaa ku noqoshada dalkii uu deganaanshihiisii hore ee joogtada ahaa ku lahaa.

X. Axdigan looma adeegsanayo dadka wakhtigan xaadirka ah ka helaa ilaalo iyo kaalmo xubnaha ama hay'ddaha Qaramada Midoobay ee aan ka ahayn Hay'adda Qaxootiga ee Qaramada Midoobay;

Sababtay doontaba ha noqotee marka ilaalada ama kaalmada joogsado, hase ahaatee aan dadkaa loogu badalin in si qeexan loo dejiyo iyadoo la raacayo qaraarada ku haboon ee ay gaadheen Golaha loo dhan yahay ee Qaramada Midoobay, dadkani xaqiiqdan awgeed waxay helayaan faaiidooyinka axdigan.

Kh. Axdigan looma adeegsanayo qof ay hay'addaha ku shaqada leh ee dalka uu ka qaatay deganaanshuhu u aqoonsadeen in uu leeyahay xuquuqaha iyo waajibaadyada ku ladhan haysashada dhalashada dalkaa.

D. Qodobada axdigan looma adeegsanayo qof walba oo loo hayo sababo halis ah looguna tixgalinayo in:

(b) uu gaysatay fal danbiyeed ka soo horjeeda nabada, danbi dagaal, ama fal danbiyeed lid ku ah bani'aadanimada, sida ku qeexan shuruucda caalamiga ah ee loo soo saaray in ay sameeyaan qodob xeeriya fal danbiyeedyada noocaa ah;

(t) hadii uu shaqsi fal danbiyeed halis oo aan siyaasad ku lug lahayn ka gaystay meel dibadda ka ah dalka uu magan galay ka hor intaan loo ogolaan in uu dalkaa qaxooti ka noqdo;

**(j)** uu danbiile ku noqday ficilo lid ku ah ujeedooyinka iyo mabaadii'da Qaramada Midoobay.

**Qod. 2. <u>Waajibaadka Guud</u>**

Shakhsi kasta oo qoxooti ah wuxuu xil ka saaran yahay in uu u hogaansamo shuruucda iyo nidaamka maamul ee u yaala dalka uu ku sugan yahay sidoo kale waa in uu u hogaansamaa tallaabooyinka lagu sugayo amniga bulshada.

**Qod. 3. <u>(takoorid la'aan)</u>**

Dalalka Heshiiska ku jiraa waa inay qodobada Axdigan u adeegsadaan qaxootiga iyagoon ku takoorayn jinsi, diin ama dalka ay ka soo jeedaan.

**Qod. 4. <u>Diinta</u>**

Dalalka heshiiska ku jira waa inay siiyan qaxootiga dhulalkooda ku sugan tixgalin ugu yaraan tan ugu haboon sida ta ay siiyeen muwaadiniintooda ee dhinaca xorriyada ku dhaqanka diintooda iyo xorriyada waxbarashada, diimeed ee ubadkooda.

**Qod. 5. <u>Xuquuqaha Aan Ku Iman Axdigan</u>**

Looma qaadanayo qodob heshiiskan ku jira in uu ka xayuubinayo xuquuqo iyo faa'iidooyin walba oo uu Dal Heshiis ku jira siiyay qaxootiga balse aan ku iman Heshiiskan.

**Qob. 6. <u>Weedha ''Marxalado Isku Mid ah''</u>**

Ula Jeedada Heshiiskan, weedha waxay u taagan tahay ‘’Marxalada isku mid ah” shuruudaha mudada iyo xaaladaha deganaansho ku meel gaadh ah, taasoo shaqsi gaar ah ay tahay inuu buuxiyo ama ka soo baxo si uu u helo xuquuqaha laga hadlayo, hadaanu qaxooti ahayn, waa inuu isagu buuxiyaa, marka laga reebo shuruudaha noocay yihiin aanu ruux qaxooti ahi awoodin in uu buuxiyo.

**Qod. 7. Reebanaanta Wax Is Dhaafsiga Siman.**

1. Marka laga reebo Axdigani qodobka u danaynaya Dalka heshiiska ku jira waa inuu siiyaa qoxootiga tix galin la mid ah ta uu siiyo ajaanibka guud ahaan.
2. Ka dib muddo saddex sanadood oo deganaansho ah, dhamaan qaxootigu waa inay helaan ka reebanaan xaga sharciyada u yaala in wax la isu dhaafsado dalka ay qaxootiga ku yihiin.
3. Dal walba oo ku jiraa waa inuu sii wado siinta qaxootiga xuquuqaha iyo faa'iidooyinka ay horay u heleen, markii aysan jirin heshiis wax is dhaafsi, xiliga uu Heshiikani ka dhaqan galay dalkaas.
4. Dalalka heshiiska ku jira waa inay si haboon isugu taxalujiyaan, suurto galinta in qaxootigu ay helaan, xuquuqaha iyo faaiidooyinka ka baxsan ama aan ahayn kuwa ay ku heleen sida ku cad tuducda 2aad iyo 3aad, markii aysan jirin wax isdhaafisi iyo waliba fidinta ka reebanaanta heshiisyada wax is dhaafsiga ee qaxootiga kuwaas oon buuxin karin shuruudaha ku xusan tuduca 2aad iyo 3aad
5. Qodobada tuduca 2aad iyo3aad ayaa loo adeegsanayaa xuquuqaha iyo faaiidooyinka lagu sheegay qodobadan

13,18,21iyo22 ee Axdigan iyo waliba xuquuqaha iyo faaiidooyinka aan Heshiiskan lagu sheegin.

**Qod. 8. Ka Dhaafida Tallaabooyinka Gaarka ah.**

Arimaha la xidhiidha talaabooyinka gaarka ah kuwaasoo si ka dhan ah looga qaadan karo qofka, hantida ama danaha muwaadiniinta dal shisheeye, dalalka Heshiiska ku jiraa uma adeegsanayaan talaabooyinkaa ruux qaxooti ah kaasoo horay u ahaa muwaadin dalkaa laga hadlayo kaliya sababtoo ah in uu dalkaas u dhashay. Dalalka Heshiiska ku jira kuwaasoo, sida sharcigoodu qabo, aanay u banaanayn adeegsiga mabaadii'da guud ee ku xusan Qodobkan waa inay, xaaladaha ku haboon, siiyaan ka dhaafida dhinaca qaxootiga caynkan ah.

**Qod. 9. Talaabooyin Ku Meel Gaadh ah.**

Qodob Heshiiskan ku jira kama reebayo Dal Heshiiska ka tirsan, xiliga dagaalka ama xaaladaha kalee (qalafsan) iyo kuwaan caadiga ahaynba, qaadashada si ku meel gaadha talaabooyinka ay u aragto in ay lama huraan u yihiin amniga qaranka iyadoo ka qaadanaysa qof (gaar ah), cadayna ka soo saaraysa in qofkani xaqiiqdii yahay qaxooti iyo waliba sii wadida talaabooyinkan la xidhiidha arrinkiisa: ay muhiim u yihiin danaha xasiloonida dalka.

**Qod. 10**. **Deganaanshaha Joogtada Ah.**

1. Hadii qaxooti xoog lagaga barakiciyey goob xiligii dagaal waynihii labaad ee dunida lana geeyey dhul ka mid ah dawladaha Heshiiskan ku jira, haatana uu goobtaas degan yahay, mudadii qasabka ay ku deganaayeen qaxootigu waxaa loo tixgelin sidii inay sharci ku deganaayeen dhulkaasi ay haatan degan yihiin.
2. Hadii qaxooti xoog lagaga bara kiciyey, xiligii dagaal waynihii labaad ee dunida, dhul ka mid ah dalalka Heshiiska ku jira, ka hor intaanu Axdigani dhaqan galin, goobtii ku soo noqday si ay deganaanshohoodii u sii wateen, mudadii deganaansho ee ka horaysay baro kicintii khasabka ahayd iyo tii ka dambaysayba waxaa loo arki inay hal deganaansho oon hakad ama kala go'a lahayn isku tahay, marka laga go'aan gaadhayo ula jeedooyin kasta oo deganaansho joogto ah.

**Qod. 11.** **Qaxooti Bad Mareena.**

Marka uu qaxooti si joogto ah uga dul shaqeeyo markab sita calanka dalka Heshiika ku jira, waa in wadankaasi uu siiyaa tixgalin gaar ah ku noolaanshaha dhulkooda iyo u soo saarida dukumintiyada socdaal ee

qaxootiga ama joogitaankooda gaaban ee dhulkooda gaar ahaana ay ku doonayaan fududaynta deganaanshaha dal kale.

**CUTUBKA 2**

**Meeqaamka Xaga Sharciga**

**Qod. 12.** **Meeqaamka Qofka;**

1. Meeqaamka shakhsi ee qaxootiga waxaa lagu maamuli sharciga dalka deegaankiisa ama hadii aysan taasi jirina sharciga dalka ee goobta uu qofku joogo.
2. Xuquuqo horay uu ruux qaxooti ah u yeeshay kuna xidhan ee meeqaamka shaqsi, siiba xuquuqaha ku ladhan guurka, waa in uu Dalkaa Heshiiska ku jiraa tixgalin siiyo ama dhawro, haday tani muhiim tahay,shuruudaha sharciga dalkaas dhigayo, hadii xuquuqda laga hadlayaa tahay mid uu aqoonsan lahaa sharciga dalkaas hadaanu ahaadeen qaxooti.

**Qod. 13**. **Hantida Guurtada iyo Ta Maguurtada ah.**

Dalalka Heshiiska ku jira waa inay siiyaan qaxootiga ilaalin ama hab dhaqan u haboon oo macquul ah isla mar ahaantaana, xaalad walboo jirta, aan ka liidan daryeelka ama hab dhaqanka ay helaan guud ahaan ajaanibka ay isku marxalada ku sugan yihiin, arimaha la xidhiidha lahaanshaha, hantida guurtada iyo ta ma guurtada ah iyo xuquqaha kale

ee la xidhiidha, iyo waliba kirooyinka iyo heshiisyada ku lug leh hantida guurtada iyo ta ma-guurtada ah.

**Qod. 14. <u>Xuquuqaha Farshaxanka Iyo Hantida warshadaha</u>**

**M**arka laga hadlayo Ilaalinta hantida la xidhiidha xaga warshadaha sida soo saarista wax cusub, naqshadaha ama moodooyinka (noocyada), astaamaha ganacsiga, magacyada ganacsiga, iyo xuquuqaha la xidhiidha suugaanta, farshaxanka iyo hawlaha cilmiga sayniska, ruuxa qaxootiga ah waa in uu ku helaa dalka uu ku leeyahay deganaanshihiisa caadiga ah, ilaalin xuquuqda si la mid ah tan ay heleen muwaadiniinta dalkaas, sidoo kale dal walba oo Heshiiska ku jira, waa inuu siiyaa ilaalin la mid ah ka dalkaasi siiyo muwaadiniinta dalka ruuxa qaxootiga ahi ku leeyahay daganaanshihiisa caadiga ah.

**Qod. 15. <u>Xaqa urur Samaynta).</u>**

Dawladaha Heshiiska ku jira siiyaan qaxootiga dalkooda sida sharciga ah ku jooga tixgalinta ugu haboon ee ay helaan muwaadiniinta ajanabiga ah, ee ay isku xaaladaha ku sugan yihiin, taasoo ah in ay samaystan ururo aan ku shaqo lahayn faa’iido doona ahayn urur shaqaale iyo urur arimaha siyaasadda ka madaxbanaan.

**Qod. 16. <u>Helitaanka Maxkamadaha</u>.**

1. ruuxa qaxootiga ahi waa in uu si madax banaan oo xor ah u helaa maxkamad sharci ah ee dhamaan dalalka Heshiiska ku jira,
2. ruuxa qaxootiga ahi waa inuu ka helaa dalka Heshiiska ku jira ee uu deganaanshihiisa caadiga ah ku leeyahay daryeel la mid ah ka muwaadiniintiisa arimaha la xidhiidha u helida maxkamadaha, taageero xaga sharciga iyo ka dhaafid lacagta Maxkamadaha.
3. Ruuxa qaxootiga ahi waa in ay siiyaan arimaha ku xusan tuduca labaad dalalka aan ahayn dalka uu daganaashaha caadiga ah ku leeyahay siinayana tixgalin la mid ah ta la siiyo muwaadin u dhashay wadanka uu daganaashaha caadiga ah ku leeyahay.

**<u>CUTUBKA 3</u>**

**<u>Shaqaalayn Dheef Leh</u>**

**Qod. 17. <u>Shaqaalayn Mushaari Ah.</u>**

1. Dalka Heshiiska ku jiraa waa inuu qaxootiyada sida sharciyaysan joogan dhulkooda siiyaan tixgalinta ugu wanaagsan ee la siiyo muwaadiniinta dal shisheeye ee ay marxaladaha isku midka ah ku sugan yihiin, marka ay timaado xaqa shaqaalayn mushaari ay ka helan.

2. Xaalad kasta ha noqotee, talaabooyin wax xadidaya oo lagu soo rogo ajaanibka ama shaqaalaynta ajaanibka si loo dhawro ama loo ilaaliyo suuqa shaqada dalka laguma qaadayo ama laguma adeegsanayo qaxootiga hore looga reebay xadidaadaas waxkhtiga uu heshiiskani ka dhaqan galay dalka heshiiska ku jira ee laga hadlayo, ama ka buuxiya shuruudaha soo socda:

**b**. uu dhamaystay saddex sano oo deganaansho wadanka ah,

**t.** uu qabo xaas leh dhalashada wadanka uu deganaansho ku leeyahay qaxootigu kuma doodi karo faa'iido uu qodobkan ku leeyahay, hadii ay kala tagaan.

**J.** uu leeyahaya mid ama in ka badan hal ubad lehna dhalashada wadanka uu degan yahay.

3. Dalalka Heshiiska ku jira waa inay qaxootiga dhamaantii u muujiyaan qalbi furan marka laga hadlayo xuquuq ay u leeyihiin shaqaalayn mushaari ah iyadoo lala masaynayo xuquuqaha muwaadiniintu leeyihiin, gaar ahaan qaxootiyada dalkooda ku soo

galay si waafaqsan qorshayawga ka mid noqoshada shaqaale ama nidaamyada laanta socdaalka.

**Qod. 18. <u>Iskiis U Shaqaysta.</u>**

Dalalka Heshiiska ku jira waa inay siiyaan qaxootiga sida sharciga u jooga tixgalin haboon suurto galna ah isla mar ahaantaana, xaalad kasta oo jirta, aan sina uga liidanayn ta la siiyo guud ahaan ajaanibta xaaladaha isku midka ah ay ku sugan yihiin, marka laga hadlayo xaqa uu iskii u leeyahay tacbashada Beeraha, Wax soo saar warshadeed, farsamada gacanta iyo baayacmushtar iyo waliba aasaasida shirkado ganacsi iyo kuwo wax soo saar.

**Qod. <u>Xirfad Madax Banaan.</u>**

1. Dalalka heshiiska ku jira mid walba waa inuu qaxootiga sida sharciga ah ku jooga dhulkooda ee sita shahaadooyin ay aqoonsadeen hay'adaha maamul ee awooda u leh ee dalkaas, isla mar ahaantaana ay ka (danaynaya) inuu ku shaqeeyo xirfado shaqo oo madax banaan, siiyaan tixgalin ama qadarin ku haboon oo suurto gal ah oo aan, xaalad kasta oo jirta, sina uga liidan ta ay helaan guud ahaan ajaanibta ay isku marxalad ku sugan yihiin.

**2.** Dalalka Heshiiska ku jiraa iyagoo waafaqsan shuruucdooda iyo dastuuradooda waa inay dalalkooda ugu hagar baxaan dajiyaana si ay u sugaan qaxootigaas ku sugan dhulalka, balse aan ahayn magaalo wayn iyo nawaaxigeeda, goobahaas oo ay u isticmaalayaan xidhiidhadooda dibada ay iyagu ka mas’uulka yihiin.

## CUTUBKA 4

## DARYEEL

**Qod. 20**. **Qaybin Badeeco:**

Meeshuu ka jiro nidaamka qaybinta badeeco iyo hab lagu maamulo qaybinta guud ee badeecadaha gabaabsiga ee loogu talagalay bulshadoo dhan, qoxootigana waxaa loola macaamilayaa sida muwaadiniinta oo kale.

**Qod. 21**. **Guri Siin**

Xaga guryo siinta, dalalka Heshiiska ku jiraa, iyadoo la raacayo inta ay shuruucda ama nidaam maamul aanay dhaafi karin gacanta haya'adaha maamulka dawlada, waa inay ula dhaqmaan qaxootiga dhulkooda sida sharciga ah u jooga sida ugu haboon ee suurto gal ah kaasoo, marxalad kastoo jirta, sinaba uga liidan karin mida ay helaan guud ahaanba ajaanabka ay isku marxaladaha ku sugan yihiin.

**Qod. 22**. **Waxbarashada Dadwaynaha.**

1. Dalalka Heshiiskan ku jira waa inay qaxootiga siiyaan tixgalin la mid ah mida ay siiyaan muwaadiniintooda dhinacyada la xidhiidha waxbarashada dugsiga hoose..
2. Dalalka Heshiiska ku jiraa waa inay qaxootiga ula dhaqmaan sida ugu haboon ee suurto gal ah habdhaqmeedkaasi oo aan sinaba uga liidan karin mida guud ahaanba la siiyo dadka ajinabka ah( shisheeye) ee ay isku marxalad ku sugan yihiin, arimaha la xidhiidha tacliinta sare, gaar ahaan inay awood u helaan samaynta daraasaad waxbarasho, iyo waliba aqoonsi siinta shahaadooyinka dugsiga sare, heer Diploma iyo Digriiba ee wadamo shisheeye, sidoo kale in laga qafiifiyo (laga yareeyo)ujurada iyo lacagaha laga qaado adeegyada waxbarasho iyo in ay helaan deeqaha waxbarasho ee dalka dibadiisa.

**Qod. 23**. **Gargaarka Dadwaynaha.**

Dalalka heshiiska ku jira waa inay siiyaan qaxootiga sida sharciga ku jooga dhulkooda kaalmo iyo gargaar la mid ah midka ay siiyaan muwaadiniintooda.

**Qod. 24. Shuruucda Shaqaalaha Iyo Damaanad Qaadka Bulshada**.

1. Dalalaka heshiiska ku jira waa inay ula dhaqmaan qaxootiga sida sharciga ku jooga dhulkooda si la mid ah sida ay ula dhaqmaan muwaadiniintooda, arimaha la xidhiidha kuwan soo socda:

b. iyadoo la raacayo ilaa iyo inta shuruucda ama nidaamyada maamul ama ay ku xidhan tahay inta ay u hogaansan yihiin hayadaha maamul: ujuuro, oo ay ku jirto lacagaha kobcinta qoyska dartii loo bixiyo taasoo ay qayb ka tahay ujuurada, sacadaha shaqada, mushqaayada sacadaha dheeriga ah, ciidaha oo la fasaxo looguna tixgeliyo maalin shaqo xaga mushaarka, xadidaada lagu soo rogo shaqada guri, xadiga ugu yer ee da'da shaqo, tababarka iyo xirfad barashada, shaqada ay qabtaan haweenka iyo da' yartu iyo inay dheefsadaan wixii faa'iido ee ka dhasha gorgortanka;

t. Damaanad bulsho (qodob sharci ah oo la xidhiidha, dhaawaca xaga shaqada, cudurada ku dhaca shaqaalaha shaqada awgeed, xaamilanimada xanuunka, naafanimada, gabowga, geerida, camal la’aanta, masuuliyadaha xaga qoyska iyo wax alaale wixii samafal loo qorsheeyo iyadoo la raacayo shuruucada iyo nidaam maamul, taasoo hoos imaanaysa qorshaha damaanadda bulshada, waxayna ku xidhan tahay shuruudaha soo socda:

(i) Waxaa la samayn karaa qorshe ku haboon dhawrista xuquuqaha la yeeshay iyo xuquuqaha lagu raad joogo in la hanto.

(ii) Shuruucda Qarameed ama xeerarka wadanka qaxootigu deganaanshaha ku leeyahay ayaa qeexi kara qorsho gaar ah oo khuseeya faaiidooyinka wax u qabad ama qaybo ka mid ah faaiidooyinkaasi ee guud ahaanba laga bixinayo sanduuqa dawlada iyo xaalad darteed loo bixiyo ee la siiyo shakhsiyaadka aan buuxinin shuruudaha qaadhaanka ee loo dejiyey abaal marinta hawl gabka caadiga ah.

2. xuquuqda mag dhaw uu u leeyahay qof qaxooti ahi geeri ku timid darteed taasi oo ku timid ama ay sababtay waxyeelo shaqada ka soo gaadhay ama cudurada shaqada ka dhasha, wax saamayn ah kuma yeelanayso deganaanshaha uu dheefsaduhu degan yahay dhul ka baxsan deegaanka dal Heshiiska ku jira.

3. Dalalka Heshiiska ku jira waa inay gaadhsiiyaan qaxootiga faaiidooyinka ka dhasha heshiisyada ay iyagu dhexdooda galeen amaba mustaqbalka gali karaan ee khuseeya dhawrista xuquuqaha la helay iyo kuwa lagu raad joogo ee la xidhiidha damaanad qaadka arrimaha bulshada, kaliyana waxaa lagu xidhi shuruudaha lagu dabbaqo muwaadiniinta wadamada Heshiikaasi saxeexay.

**4.** Dalalka Heshiiska ku jiraa waa inay si qalbi furan u eegaan gaadhsiinta qaxootiga, sida ugu macquulsan, faaiidooyinka ka dhasha heshiisyada la midka ah kuwaasi oo waqti kasta dhaqan gal ka dhex ahaan kara Dalalka Heshiiskan ku jira iyo kuwa aan Heshiiska ku jirin.

## CUTUBKA 5

## Tallaabooyinka Maamul

**Qod. 25**. **Gargaarka Maamul:**

1. Marka xuquuq uu leeyahay ruux qaxooti ahi adeegsigeedu ay caadiyan ku xidhan tahay kaalmada hay'adaha maamul ee dalal shisheeye kuwaasoon isagu la xidhiidhi karin, waa in ay, Dalalka Heshiiska ku jira ee uu dhulkooda degan yahay, u diyaariyaan in ha'addahooda maamul ama kuwo caalami ahi u fidiyaan kaalmadan.
2. Haya'adda ama haya'addaha maamul ee ku xusan tuduca 1aad waa inay siiyaan amaba sababaan in la siiyo iyagoo kormeeraya dukumintiyada ama shahaadooyinka caadiyanba ajaanibta ay siiyaan ama loo sii mariyo ha'addaha maamul ee dalkaas.
3. Dukumintiyada ama caddaymaha sidaasi lagu siiyo qaxootiga waxay la mid yihiin dukumintiyada sharciga ah ee la siiyo ajaanibta amaba loo sii mariyo hay'adaha maamul ee wadamadooda, isla mar ahaantaana waxaa la siin aqoonsi ansax ahaanshahooda hadaanay jirin cadayn lid ku ah.
4. Iyadoo loo hogaansamayo mudnaanta gaarka ah ee dadka saboolka ah, ujuro ayaa laga qaadi karaa adeegyada halkan ku xusan, hase ahaatee ujuradaasi waa inay ahaataa dhaxdhaxaad isla mar ahaantaana la mid ah ta laga qaado muwaadiniinta adeegyo la mid ah loo qabto.
5. Shuruudaha Qodobkan waxba uma dhimayaan qodobada 27aad iyo 28aad.

**Qod. 26. Xoriyada Dhaqdhaqaaqa.**

Dal walba oo Heshiiska ku jira waa inay qaxootiga sida sharciga ah ugu sugan dalkeeda siiyaa xaqa ay u leeyihiin in ay ku doortaan goobta ay degayaan iyo in ay si xor ah u dhex maraan dalka gudihiisa, iyadoo loo hogaansamyo.

**Qod. 27. Warqadaha Aqoonsiga**.

Dalalka Heshiiska ku jiraa waa in ay siiyaan warqadaha aqoonsiga qof kastoo qaxooti dhulkooda ku sugan ah isla markaana aan haysan dukuminti socdaal oo ansax ah.

**Qod. 28**. **Dukumintiyada socdaalka**

1. Dalalka Heshiiska ku jira waa inay qaxootiga sida sharciga ku jooga dhulkooda siiyaan dukumintiyada socdaalka si ay ugu suurto gasho socdaal dibada ka ah dhulkooda hadii aysan jirin sababo daruuri ah oo amniga qaranka ama kala danbaynta dawladnimo wax u dhimaynin, si ka duwan mooyee shuruudaha ku yaala Jadwalka ee Heshiiskan ayaa lagu dabbaqi dukumintiyadan. Sidoo kale dalalka Heshiiska ku jiraa waxay siin karaan dukuminti socdaal qof walboo qaxooti ah oo dhulkooda ku sugan khaasatan waa inay qalbi furaan uga muujiyaan siinta dukumintigan socdaal qaxootiga dhulkooda jooga kuwaas oo aan awoodin in ay ka helaan dukuminti socdaal dalka ay deganaashaha sharciga ah ku leeyihiin.
2. Dukumeentiyada socdaal ee heshiisyada Caalamiga ee la siiyay qoxootiga waxaa loo aqoonsanaya loona arkayaa mid la mid ah kay dawladaha Heshiiska ku jira ay bixiyeen sida ku xusan Qodobkan 28

**Qod. 29**. **Lacagaha La Qaado .**

1. Dalalka Heshiiska ku jiraa waa inayna ku soo rogin qaxootiga noocyada kala duwan ee cashuuraadka ama lacagaha adeegyada wax qabad loo bixiyo, sifahay doonaan ha yeesheene, oo aan ka sareeysiin kuwa laga qaado ama ay tahay in laga qaado muwaadiniintooda ay isku duruufta yihiin.
2. Waxyaabaha ku xusan tuduca sare kama hor istaagayaan qaxootiga in lagu dabaqo shuruucda iyo xeerarka u yaalo lacagaha la qaado ee la xidhiidha siinta ajaanibta dukumintiyada dawliga ah oo ay ku jiraan warqadaha aqoonsigu.

**Qod. 30. Hanti wareegsi**

1. Dalka heshiiska ku jiraa waa inuu si waafaqsan shuruucdiisa iyo xeerarkiisa, u ogolaadaan qaxootigu hantidooda ay la soo galeen in ay ula wareegaan dal kale oo looga ogolaaday dib u dejin awgeed.
2. Dalka Heshiiska ku jiraa waa inuu siiyaa tixgalin naxariis leh codsiga qaxootiga ku doonayaan ogolaansho in ay hanti wareegsi
3. samaystaan meel kasta ha taalee gaar ahaan kuwa lagama maarmaanka u ah dib u dagooda dalka ay qaabilaada ka heleen.

**Qod. 31. <u>Qaxooti si Sharci Darro ah ku soo galay Dalka Uu magan Galay.</u>**

1. Dalalka Heshiiska ku jiraa qoxootiga si toos ah uga yimid dhul ay naftooda iyo xorriyadoodaba khatar ku ah sida uu qabo Qodobka 1aad waa inayna ku soo rogin ciqaabo, soo galida ama joogitaankooda sharci daro darteed, soona galay ama ku sugan dhulkooda ogolaansho la'aan waase haddii isla markay soo galaanba iska xaadiriyaan hay'addaha maamul ayna muujiyaan sabab macquul ah oo la xidhiidha joogitaankooda ama soo gelidooda sharci darada ah.
2. Dalalka Heshiiska ku jiraa waa in ayna u adeegsan dhaqdhaqaaqa qaxootiga caynkan ah xadidaado aan ka ahayn kuwo muhiim ah waxaana xadidaadaha caynkaa ah la adeegsan tan iyo inta meeqaamkooda aqoonsi ee dalka gudihisa laga dhigayo mid rasmi ah ama inta ay ka helayaan ogolaansho wadanka kale. Sidoo kale Dalalka Heshiiska ku jiraa waa inay u ogolaadaan qaxootiga caynkaa ah waqti macquul ah iyo dhamaan waxyabaha lama huraanka u ah helitaanka qaabilaad dal kale.

**Qod. 32. <u>Masaafurin.</u>**

1. Dawladaha Heshiiska ku jira waa in ayna masaafurin ruux qaxooti ah oo si sharci ah ku jooga dhulkooda marka laga reebo arrimaha la xidhiidha amniga qaranka ama kala danbaynta dawladnimo.
2. Masaafurinta qaxootiga noocan ah waxaa kaliya oo ay ku iman kartaa go'aan lagu gaadhay si waafaqsan wado sharci ah. Marka laga reebo xaalado xasiloonida u dan ah sidaa si ka duwan dalbayaan mooyee, qaxootiga waxaa loo ogolaan inay keenan cadaymo uu isku difaacayo isla mar ahaantaana uu rafcaan ku qaato iyo in cid kale arrintaas uga matasho marka uu ka hor cadeeynayo haya'addaha awooda u leh shakhsi ama shakhsiyaad ay haya'dda awood u lihi si khaas ah ugu qoondaysay.
3. Dalalka Heshiiska ku jiraa waa inay u ogolaadaan qaxootiga caynkaa ah waqti macquul ah uu ku raadsado qaabilaad sharci ah oo dal kale ah. Dalalka Heshiiska ku jiraa waxay ka gaabsanayaan xaqa ay u

leeyihiin in ay adeegsadaan tallaabooyin gudaha ah ee ay dan moodaan.

**Qod. 33. <u>Mamnuucidda Musaafirinta ama celinta:</u>**

1- Dal Heshiiska ka mid ah sinaba xaaladay doonto ha u dhacdee lama masaafurin karo ama laguma celin karo qof qaxooti ah xuduudaha deegaamo ay naftiisa iyo xorriyadiisuba ay halis ku galayso, iyadoo ay

ugu wacan tahay jinsigiisa, diintiisa, tafiirtiisa ka tirsanaan koox-bulsheed ee gaar ah ama aragtidiisa siyaasadeed.

2- Faa'iidada qodobkan, siday dooni ha ahaatee, ma sheegan karo qof qaxooti ah oo loo hayo sababo macquul ah oo tibaaxaya in uu khatar ku yahay xasiloonida dalka uu ku sugan yahay, ama qof uu ku dhacay xukun kama danbays ah oo laga gaadhay dambi gaar ah oo aad u culus ugana dhigan khatar bulshada dalkaas.

**Qod. 34. <u>Dhalasho Siin.</u>**

Dalalka Heshiiska ku jira waa inay sida ugu suurto galsan u fududeeyaan sidii qaxootigu uga mid noqon lahaa bulshada dalka iyo dhalasho siintoodaba. Khasatan inay sameeyaan dadaal kasta oo lagu dedejinayo hawlaha dhalasho siinta isla mar ahaantaana loo yarayn lahaa sida ugu suurto galsan lacagaha la qaado iyo kharashka hawlahan.

## CUTUBKA 6

## Qodobo Fulin Iyo Kuwo ku Meel Gaadh ah.

### Qod. 35. Iskaashiga Ha'addaha Maamullada Dawladeed la Yeelanayaan Qaramada Midoobay.

1- Dalalka Heshiiska ku jira waxay mas'uuliyad ka saaran tahay inay iskaashi la sameeyaan Hay'ada Qoxootiga ee Qaramada Midoobay, ama ha'adda kalee ee Qaramada Midoobay ee dhaxla , inta uu ku gudo jiro fulinta hawlihiisa, khasatana waa inay u fududeeyaan xilka ka saaran kormeeridda dhaqan galinta qodobada Axdigan.

2- Si ay suurto gal ugu noqoto in Xafiiska Hay'adda Qoxootiga ama haya'adda kale ee Qaramada Midoobay ee hawsha kala wareegta, warbixino ugu diyaariyaan laamaha awooda u leh ee Qaramada Midoobay, Dalalka Heshiiska ku jiraa waxaa xil ka saaran yahay inay qaabka ku haboon ugu soo gudbiyaan macluumaadka iyo tira-koobka laga codsaday ee khuseeya:

b- Xaalada qaxootiga,

t- Hir-gelinta Axdigan, iyo

j- shuruucda, xeerarka iyo wareegtooyinka la xidhiidha qaxootiga ee dhaqan galay ama hada ka dib dhaqan galidoona.

**Qod. 36**. **<u>Xogta ku saabsan Sharciga Wadanka.</u>**

Dalalka Heshiiska ku jira waa inay ku wargaliyaan Xoghayaha Guud Ee Qaramada Midoobay Shuruucda iyo xeerarka laga yaabo in ay u qaataan xaqiijinta adeegsi Axdigan.

**Qod. 37**. **<u>Xidhiidhka Axdiyadii Hore.</u>**

Iyadoon wax loo dhimayn Qodobka 28aad tuduca 2aad, ee Axdigan, wuxuu bedelaya, dhinacyada ku jira dhexdooda, Qorsheyawgii 5tii Juulaay 1922,kii 31kii meey 1924kii 12 meey 1926kii, 30kii juun 1928, 30kii Juulaay 1935tii, Axdiyadii 28 kii Oktoobar 1933kii iyo 10kii Febraayo 1938kii, habmaamuuskii 14kii sebtenbar 1939kii iyo Heshiikii 15kii oktoobar 1946kii.

## <u>CUTUBKA 7</u>

## <u>Qodobada Gunaanadka</u>

**Qod. 38**. **<u>Xalinta Ismaan-Dhaafyada.</u>**

Ismaandhaaf kasta oo dhex mara dhinacyada Heshiiska ku jira oo la xidhiidha fasiraada ama adeegsiga kuwaasoon si kale lagu xalin karin, waa in, marka hore codsi ka yimaado mid ka mid ah dhinacyada is maandhaafsan dabadeed lala doonto Maxkamada Caalamiga.

**Qod. 39. <u>Saxeex, Ansixin Iyo Ku Biirid.</u>**

1. Axdigan wuxuu u furan yahay in la saxeexo 28ka Juulaay 1951ka wixii waqtigaa ka dambeeyana waxaa loo dhiibayaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay. Waxaa kale oo uu in la saxeexo uga furaanayaa Xafiiska Yurub ee Qaramada Midoobay laga bilaabo tan iyo 28ka Juulaay ilaa 31ka Agosto ee 1951ka, isla mar ahaantaana waxaa dib looga furi doonaa in la saxeexo xarunta Qaramada Midoobay laga bilaabo tan iyo 17ka sibtembar 1951ka ilaa 31ka Diisembar 1952ka,
2. Axdigan wuxuu u furaanayaa in lagu saxeexo magacyada dhamaan dalalka xubin ka ah Qaramada Midoobay, iyo waliba magaca dal kasta oo lagu marti qaaday inuu ka qayb galo shirkii Plenipotentiaries ee meeqaamka Qaxootiga iyo dadka wadan aan lahayn ama kuwa uu golaha loo Dhan yahay ku casuumay in ay saxeexaan. Sidoo kale waa la ansixin aqbalaada Axdigan isla mar ahaantaana dukumintiga ansixinta waxaa loo dhiibi Xoghayaha Guud ee Qaramada midoobay.
3. Axdigan wuxuu u furraan doonaa ku soo biiritaanka 28ka juulaay 1951ka in ay wadamada ku xusan tuduca 2aad ee Qodobkan laga bilaabo ku soo biiriduna waxay ansax noqonaysaa marka loo gudbiyo dukumintiga xambaarsan ku soo biirida Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

**Qod. 40**. **<u>Qodobka Ku Dabbaqaada Deegaameed.</u>**

1. Dalkasta waxaa la gudboon, xiliga saxiixa, ansaxinta ama ku soo biiridda, inuu shaaca ka qaado in Axdigani ku faafayo dhamaan ama qaybo ka mid ah deegaannada ay xidhiidhadooda caalamiga

ah masuulka uga yihiin. Baaqaasina wuxuu ansax noqonayaa waqtiga uu Axdigani ka dhaqan galo dalka laga hadlayo.

2. Xili kasta wixii intaa ka danbeeya fidin kasta oo noocaa ah waxay ku suurto gelaysaa ogaysiis lagu hagaajinayo Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay isla mar ahaantaana waxay taabo gal noqonaysaa maalinta sagaalaad ka dib maalinta uu ogaysiiskani soo gaadhay Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, ama maalinta uu Axdigani ka dhaqan galay dalka laga hadlayo, kii doonaa ha danbeeyee.

3. Marka laga hadlayo deegaannada aan loogu tala galin saxeexa, ansixinta ama ku soo biiridda in aanu axdigani ka dhaqan galin dal walba waa inuu tixgaliyaa sidii ay ku suurto gali lahaayeen talaabooyin muhiim ah oo loo qaato ku dabbaqaada Axdigaan deegaannadaas iyadoon la dhaafayn, marka ay mihiim tahay sababo tastuuri ah awgood, rabitaanka dawladaha deegaannadaas

**Qod. 41**. **<u>Qodob Federaal.</u>**

Marka ay dawladu tahay federaal ama mid aan meel kaliya laga xukumin, qodobada soo socda ayaa lagu dabaqi:

b. Qodobada Axdigan ee hoos imanaya awooda sharci dejin ee haya'adaha sharci dejinta ee federaalka, waajibaadyada dawlada federaalku waxay baaxada noqonayaan kuwa la mid ah sida kuwa xubnaha Axdigan ku jira ee aan ahayn dawlado federaal ah.

t. Qodobada Axdigan ee hoos imaanaya awooda sharci dejin ee dawladaha ismaamul hoosaadka leh, deegaannada ama gobalada kuwaasoo, sida uu qabo qaabka dastuuri ee isku dhafka ah (federeeshin), aan ku qasbanayn inay ku dhaqaaqaan talaabo sharci dejin, dawlada dhexe waa inay keento qodobadan caynkaa ah iyadoo raacinaysa talabixin ku haboon isla mar ahaantaana ku war galinaysa waqtiga ugu dhaqsaha badan uguna suurta galsan haya'adaha ku shaqada leh ee dawladaha maamul hoosaadka leh, deegaanada ama gobolada.

j. Dawlada federaalka ah ee xubin ka ah Axdigan waa inay, codsiga dal walboo kale oo Axdiga ku jira ee soo maray Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, u bayaamiso Qaramada Midoobay waxa uu ka qabo sharcigan iyo dhaqanka (practice) maamul ee dawlada isku dhafka (federashinka) iyo qaybaha ay ka kooban tahayba Qodob walboo Axdigan ka mid ah oo cayiman iyadoo mujinaysa xaddiga ama baaxada saamayn ee Qodobkaas sharciga ama ficilo kale .

**Qod. 42. <u>Ka Gaabsasho</u>**

1. xiliga saxeexa, ansixinta ama ku soo biiridda dal walbaa wuxu ka gaabsan karaa qodobada Heshiiskan ee aan ka ahayn qaodobada 1,3,4, 16(1) 33, 36-46 gebi ahaan.
2. Wadan walba oo sameynaya ka gaabsasho sida ku xusan tuduca 1aad ee qodobkan wuxuu xiliguu doono ka noqon karaa ka gaabsigiisa isagoo arintaa ku war galinaya Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.

**Qod. 43. <u>Dhaqan Galka Heshiiska.</u>**

1. Axdigani wuxuu dhaqan galayaa maalinta sagaalaad ee ku xigta maalinta kaydinta dukuminitigan lixaad ee ansixinta ama ku soo biiridda.
2. Dal walba oo ansixinaya ama ku soo biiraya Heshiiska ka dib kaydinta dukumintiga lixaad ee ansixinta ama ku biirida, Axdigani wuxuu ka dhaqan galayaa maalinta sagaalaad ee ku xigta wakhtiga uu dalkaasi dhigaan dukimintiga ansixinta ama ku biirida.

**Qod. 44. <u>(Ka Bixid)</u>**

1. Dal walba oo Heshiiska Ku jiraa wuxuu ka bixi karaa Axdigan waqti kasta isagoo ku war galinaya Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.
2. Ka bixida caynkaas ah waxay taabo gal ka noqonaysaa dalka ay khusayso mudo sanad ah laga bilaabo tan iyo maalintuu wargalinta helay Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.
3. Dal walba oo sameeyey baaq ama wargalin waafaqsan qodobka 40aad wuxuu, wakhti kasta markaa ka dib, isagoo war galinaya Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, ku baaqi karaa inuuna Axdigan ka fulayn dhulkaasi sanad ka dib taariikhda uu Xoghayaha Guud ee Qaramada midoobay uu helay wargalinta.

**Qob. 45. <u>Dib U Eegid (Muraajaco)</u>**

1. Dal walba oo Heshiiska ku jira ayaa codsan kara dib u eegida Heshiiskan wakhtiguu doono isagoo ku war galinaya arrintaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay.
2. Golaha loo dhan yahay ee Qaramada Midoobay ayaa ka talo bixin talaabooyinka, hadayba jiraan, loo qaadan karo codsigaa.

**Qod. 46. <u>Ogaysiisyada Xoghayaha Guud Ee Qaramada Midoobay.</u>**

Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waa inuu ku war galiyaa dhamaan xubnaha qaramada midoomay iyo kuwa aan xubnaha ka ahayn ee ku xusan Qodobka 39aad:

b. Baaqyada iyo ogaysiisyada si waafaqsan Qormada (qayb) **T** ee qodobka 1aad.

t. Saxeexyada, ansixinta iyo ku soo biiridda si waafaaqsan Qodobka 39aad.

j. Baaqyada iyo ogaysiisyada si waafaqsan qodobka 40aad.

x. Ka gaabsiyada iyo ka noqoshooyinka si waafaqsan qodobka 42aad.

kh. Xilliga uu dhaqan galayo Heshiiskakani si

waafaqsan qodobka 43aad.

d. Ka bixidda iyo ogaysiisyada si waafaqsan qodobka 44aad.

r. Codsiyada dib u eegida si waafaqsan 45aad.

Aaminaada ama caqiidada dadka hoos ku saxeexan, awooda buuxdana loo siiyay ayaa saxeexay Axdigan iyagoo ka wakiil ah mid walbaa dawladiisa.

Waxaa lagu qabtay jineefa maalinta sideed iyo labaatanaad ee Juulaay 1951kii, waana hal nuqul, kaas oo ay daabacaada Ingiriisiga iyo faransiiska si isku mid ah asal u yihiin isla mar ahaantaana waxaa la dhigayaa xafiiska xusuus dhawrka ee Qaramada Midoobay, sidoo kalena nuqulo dhab ah ayna siinayaa dhamaan wadamada xubnaha ka ah iyo kuwaan ka ahayn Qaramada Midoobay ee lagu sheegay Qodobka 39aad.

**JADWAL**

**TUDUCA 1aad**

1. Dukumintiyada socdaal ee lagu sheegay qodobka 28aad ee Axdiga waxay la mid noqonayaan muunada (tusaalaha) ku lifaaqan halkan.
2. Dukumintiga waxaa laga soo saari ugu yaraan laba luuqadood, mid ka mid ahina waa inay noqotaa Ingiriis ama faransiis.

**TUDUCA. 2aad**

Iyadoon la dhaafayn xeerarka u yaala wadanka soo saaray( samaynaya), caruurta waa lagu dari karaa dukumintiga socdaal ee waalidka ama, xaaladaha gaarka ah, qaxooti kaloo qaan gaadh ah.

**TUDUCA. 3aad**

Lacagaha adeeg ee lagu soo dalaco (qaado) waa inayna ka badan qiimaha ugu hooseeya ee laga bixiyo (qaado) dal ku galka (passport) wadanka (qaranka).

**TUDUCA. 4aad**

Xaalado muhiim ama kuwa gaar ah mooyiye, dukumintiga waa in laga dhigo mid lagu galo tirada ugu badan uguna suurto galsan ee wadamo ah.

**TUDUCA. 5aad**

Dukumintigu waa inuu shaqeeyaa hal ama laba sano midkood, iyadoo ku xidhan awooda ikhtiyaar ee haya'adda bixinaysa.

**TUDUCA. 6aad**

1. Cusboonaysiinta ama mudo kordhinta ansax-ahaanshaha dukumintiga waa arrin u taala ( ay leedahay) haya'addii soo saartay, tan iyo inta situhu (xaqluhu) uuna yeelan daganaan sharci ah oo dhul kale ah balse uu si sharci ah u degan yahay dhulka haya'adda maamul ee la carabaabay. Sidoo kale soo saarista ama siinta dukuminti cusub, xaaladaha ama shuruudaha la midka ah, waa arrin

u taala (ay leeday) haya'addii maamul ee soo saartay (bixisay) dukumintigii hore.

2. Haya'addaha diblomatiga ama qunsuliyadaha, sida khaaska ahna awooda ugu leh, waxaa loo awood siin karaa inay kordhiyaan mudo aan ka badanayn lix bilood, ansax-ahaanshaha dukumintiga socdaal

   ee ay dawladoodu soo saartay.

3. Dalalka Heshiiska ku jiraa waa inay qalbi furnaan ka muujiyaan cusboonaysiinta ama kordhinta ansax-ahaanshaha dukumintiga socdaal ama siinta dukumintiga cusub ee qaxootiga aan sinaba si sharci ah u deganayn dalalkooda isla mar ahaantaana aan awoodin in ay ka helaan dukuminti socdaal dalka deganaanshaha sharciga ah ku leeyihiin.

**TUDUCA. 7aad**

Dalalka Heshiiska ku jira waa inay aqoonsadaan ansax-ahaanshaha dukumintiyada lagu soo saaray si waafaqsan qodobka 28aad ee Heshiiskan.